**Gundhig ay waalidiinta iyo shaqaalaha xanaanadu ay si wadajir ah ugu samaynayaan baaritaanka caafimaad qabka ilmaha 4 sano da'aadu tahay.**

1. **Dareenka horukaca nolosha, la dhaqanka bulshada, wax is waydaarsiga dhexmara ilmahai yo dadka kale iyo ciyaarta**

<u>Ilmuhu markuu jiro afar sano</u>

- wax walba inuu ogaado oo uu tijaabiyo ayuu jecelyahay, wuxuu rabaa inuu baaro, arko, tuso xirfadiisa waana is hubaa.
- Asagoo wax walba samaynkara ayuu hadana weli u baahanyahay koolkoolin iyo in loogu yeero ''nuune'', arintaasian waxay ubaahantahay tixgelin gaar ah
- wuxuu bilaabayaa inuu dareemo masuuliyad iyo dambiilenimo
- Inta badan wuxuu ka cabsadaa waxyaabaha arag xumaanta la xiriira: mugdiga, dad si kale u eg, masaska, bixitaanka waalidka
- wuxuu isku dayaa inuu ogaado hawlaha dadka kale ay qabtaan wuxuuna jilaa hawlahaas markuu ciyaarayo, sida isagoo jila waalidku wuxuu qabto iyo isagoo model ka dhigta sheekooyinka iyo telefishinka.
- wuxuu doonaa inuu maqsuudiyo waalidkiisa, dadka waaweyn, wuxuuna doonaa inuu hanto dhaqankooda bulsho ahaaneed
- wuxuu si wanaagsan u ilaalin yaqaanaa sharciyada, wuxuuna si wanaagsan u arkaa shaci jabinta ay dadka kale samaynayaan
- wuxuu leeyahay dareen naxariiseed (hadii qof kale ooyo) iyo niyad wanaag hadii uu qof ka farxiyo ama uu umadax salaaxo
- wuxuu gani ka yahay xagga maskax wax ka suureynta, waxaana laga yaabaa inuu leeyahay saaxiib uu isagu maskaxda ka suureystay.
- mar walba ma kala saarikaro xuduuda u dhaxaysa runta iyo khiyaaliga, waxyaabaha uu suuraystay inay sax yihiin ayuu u haystaa
- hadii uu helyo wuxuu jeclaanlahaa inuu la ciyaaro ilmo kale uuna sidaas ku tijaabiyo kuna samaysto xiriir saaxiibnimo.
- hadiiba waa yaqaan wadaxaajoodka wuxuuna ka shaqeeyaa sidii ay saaxiibtinimadu u waari lahayd
- ilmuhu wuxuu baranayaa inuu lafaguro muranada ugu horeeya oo dhexmara asaga iyo dadka kale, markaasna wuxuu u baahanyahay caawinaada dadka waaweyn
- markuu ciyaaraayo ilmuhu wuxuu muujiyaa dareemadiisa ad adag, cabsi, cawinaad la'aan, tiiraanyo iyo kalinimo.

<u>Arimaha la xiriira koritaanka oo ay tahay in laga welwelo</u>

- arimaha joogtada ah ee la xiriira hawl maalmeedka: tusaale ahaan cunto diidid ama cunto cun badan, musqul aadid la'aan (isku kaadin, wasaq walaaqid, wax sheegid la'aan)
- ilmaha waxaa ku dhacda baqdin yaab leh oo ka weyn baqdimaha caadiga ah
- ilmuhu wuu is waxyeeleeyaa ama wuxuu mar walba galaa halis
- ilmuhu dulqaad fiican ma leh wuxuuna u dhaqmaa si caro leh hadii uu waayo wixii uu rabay, mana yaqaano inuu hadal ahaan usoo gudbiyo wuxuu tabanaayo oo ka xanaajiyey
- ilmuhu waqti dheer ayuu tiiraanyaysnaadaa
- ilmuhu wuxuu inta badan diidaa inuu sameeyo waxyaabaha ay sameeyaan caruurta isaga le'eg, si cadna uma hubo aqoontiisa
- ilmuhu ma dalbado mana qaato cawinaada iyo madax salaaxida dadka waaweyn hadii uu tiiraanyaysan yahay ama uu asagu is dhaawaco.
- Ilmaha way ku adagtahay inuu fahmo fariimaha seenyaaleynta ah iyo jir kahadalka ee dadka kale

- ilmuhu dib  ayuu uga baxaa ciyaarta mana ku biirio waxyaabaha ciyaalku sameynayaan iyo ciyaaraha.
- Darajada ilmuhu markay ciyaarayaa mar walba waa isku mid (tusaale. hogaamiye, wax walba la qabsade, eey iwmjne.)

| meeshaan waxaa loogu talo galay xasuus qor: |
| --- |
| |

## 2. Feejignaan, niyad u hayn, fakar, xasuus ja barasho

<u>ilmuhu markuu jiro 4 sano</u>

- wuxuu arko ayuu aaminaa -aragtida ilmaha ayaa hogaamisa fakarkiisa
- waa yaqaan inuu sheego waxa uu kafakaraayo
- wuxuu caqliyeeyaa waxyaabihii uu shalay arkay wuxuuna xaliyaa dhibaatooyinka
- wuxuu awood u leeyahay inuu fikradihiisa is barbar dhigo, kala qaybiyo isna barbar dhigo
- xasuus badan ayuu leeyahay, muga xasuustiisuna waaba 3-4 unug (unug ) xusuuseedku wuxuu ahaan karaa xaraf, lambar, eray iwm.)
- wuxuu dib u xasuusan karaa ilaa iyo dhowr waxyaabood
- wuxuu u shaqeeyaa si qorshaysan
- wuxuu fahmaa ilaaliyaana shuruucda
- wuxuu wax bartaa marka laga hago .

<u>Arimaha la xiriira koritaanka oo ay tahay in laga welwelo</u>

- ilmuhu wax ma baranaayo ama si tartiib ah ayuu wax u baranayaa tusaale, dadka uu yaqaan magacyadooda, heesaha
- ilmuhu ku shaqaynmaayo sida wax loogu sheegay (maqal) ama (aragti)
- ilmuhu ma xasuusto wixii uu mar dhaweyd sameeyey( tusaale, wixii uu canay, meesha uu tagay, wixii uu arkay ama meeshii uu alaabtiisa ugatagay)
- ilmuhu wuxuu inta badan yiraahdaa oo arimaha ku xaliyaa "ma xasuusto"
- inta badan caruurta waa ku adagtahay inay arin wadaan ilaa dhammaadka
- ilmuhuu waa ka war wareegaa shaqooyinka adag iyo isku dayga faraha badan
- arbushaadaha ka imaanya waxyaabaha ku xeeran agagaarka ilmaha ayaa markasta u diida inuu si fiican hal wax maskaxdiisa isugu geeyo
- ilmuhu wuxuu u dhaqmaa si aan daganeyn, kursiga si ciican uguma fariisto, alaabada ayuu jiid jiidaa
- ilmuhu ma joogsan karo xaaladahana kama fakaro inta uu san faraha la gelin ka hor
- ilmuhu ma sugi karo wageesiisa

| meeshaan waxaa loogu talo galay xasuus qor: |
|---|
| |

## 3. Koritaanka xagga luuqadda

Hadii luuqada ilmuhu tahay luuqad aan ahayn finnish ama swidish waxaan qiimaynta aqoontiisa luuqada finnishka uga faaiidaysan karnaa foomamka lagula socdo barashada luuqada.

ilmaha 4 sano jirka ah

- wuxuu fahmaa hadalada caadiga ah
- wuxuu xiiseeyaa hal xiraalaha iyo geeraarada (aqoonta luuqadu way kobcaysaa)
- wuxuu isticmaalaa kumlado sax ah, – iyo kuwa jumladaha kaaba
- wuxuu sheegaa dhacdooyin , sheeko xariiro aad ayuuna ugu wanaagsanyahay inuu sheego dhacdooyin iyo waxyaabo kale (hadal wax sheegid ah)
- hadalkiisa wuxuu ku bixiyaa tilmaamo (weyn, yar), wuxuuna suuradayn yaqaanaa alaabooyinka iyo waxyaabaha kale
- wuxuu u hadlaa si cad oo la fahmikaro, inkastoo ku dhawaaqida erayada qaarkood laga yaabo inay ka maqanyihiin
- wuxuu yaqaan wada sheekaysiga iyo dhagaysiga dadka kale, wuxuu maqlana suaalo ayuu ka waydiiyaa
- waa sualaalo badanyahay suaalihiisana waxaa kamida ´sabab iyo maxaa loogu talo galay?´ -wuxuuna rabaa jawaabo si fiican u qeexan

Arimaha la xiriira koritaanka oo ay tahay in laga welwelo

- ilmuhu wuxuu isticmaalaa erayo kooban
- ilmuhu ma fahmo waxyaabaha loo sheego ama hagida la siiyo
- hadalka ilmaha waxaa ka buuxa khaladaad fara badan oo xagga ku dhawaaqida erayada ah
- waa adagtahay in la fahmo hadalka ilmaha
- hadalka ilmaha waxaa ka buuxa khaladaad xagga naxwada ah
- hadalka ilmaha waxaa ku yar wax sheegida iyo wax suuraynta
- hadalka ilmaha waxaa ku soo baxa calaamado shig shigid ah ugu yaraan mudo sadex bilood ah

| meeshaan waxaa loogu talo galay xasuus qor: |
| --- |
| |

## 4. Aqoonta waxqabadka matoorka iyo firficoonida

ilmaha 4 sano jirka ah

- Aqoonta dhaqdhaqaaqa asaasiga ah (tusaale. toos u socodka, orodka, bood boodka) iyo wuxuu si fiican u xukumaa dheeli tirkiisa
- qalinka si fiican ayuu u qabsan karaa (sivellinote)
- kaligii ayaa dharka gashada (tusaale jiinyeerka iyo galuusyada)
- wuxuu kala yaqaan qaybaha jirkiisa

Arimaha la xiriira koritaanka 4 jirka oo ay tahay in laga welwelo

- arimaha la xiriira xirfadda gacanta iyo indhaha, waxyaabaha u baahan wadashaqaynta indhaha iyo gacmaha way ku adagyihiin (tusaale. tixida xuusha, ku dhajinta, koob wax ku cabida)
- ilmuhu ma awoodo inuu qabto hal mar labo waxyaalood oo u baahan ficil (sida, inuu wax qaado asagoo jarankaro fuulaya)
- ilmuhu wuu kufaa wuxuuna u dhacaa si sahlan
- ilmuhu ma awoodo inuu jilo dhaq dhaqaaq ama qaab kale oo la tusay inuu sameeyo
- ilmuhu ma awoodo inuu si fudud u boodo

Wax qabsashadiisa
ilmaha 4 jirka ah tusaale

- musqusha wuxuu aadaa kaligiis
- asagaa gacmaha dhaqda iskana qalajiya
- asagaa dharka gashada iskana siiba si xor ah (weli xariga kabaha ma xiran yaqaan)
- mar walba wuxuu isticmaalaa fargeeto
- asaga ayaa cabitaanka raada, kana shubta weelka
- rootigana asagaa subaga marsada.

| meeshaan waxaa loogu talo galay xasuus qor: |
|---|
| |

## 5. Majiraan arimo la xiriira nolol maalmeedka qoyskiina oo la xiriira koritaanka iyo horumarka ilmaha, arimahaas oo aad jeclaanlahaydeen inaad kala sheekaysataan shaqaalaha xanaanada caruurta ama rugta hooyada iyo dhalaanka?

| meeshaan waxaa loogu talo galay xasuus qor: |
|---|
| |

Tusaalaha foomka isweydaarsiga ee ka dhexeeya xanaanada carruurta iyo rugta hooyada iyo dhalaanka ee ku saabsan baaritaanka caafimaadqabka ilmaha 4 jirka ah

**Aragtida ay ilmaha ka qabaan waalidka iyo goobta xanaanada caruurtu (**foomlka internetka ah ee **Effica** waxaa la buuxinayaa marka laga sheekeysanayo barbaarinta hore)

Magaca ilmaha iyo waqtiga uu dhashay:________________________Ciwaanka jidka:_____________________
Luuqadda hooyo __________________Maalinta uu xanaanada bilaabay iyo da'ada_______________________
Xanaanda/ Qaybta_______________________________________________PL_________________________
Magaca shaqaalaha iyo tel_________________________________________________________________
Magaca rugta hooyada iyo dhalaanka iyo kalkaaliyaha caacimaadka ___________________ tel._____________
Ayadoo la isticmaalayo ruqsada waalidiinta, macluumaadka ilmaha waxay xanaanadu u diri kartaa rugta hooyada iyo dhalaanka ee ilamahu ka tirsan yahay haa____maya____

Sixiixa waalidka ______waxaa la weydiisanayaa daabacaadda-Effica___________________________

1. **Kobcida dareenka nolosha, xirfadaha bulsho ladhaqanka, wax is weydaarsiga dadka kale, iyo ciyaarta**

| |
|---|
| waxa uu ilmuhu ku fiicanyahay yahay/ waxa in laga caaawiyo u baahan: |

2. **Wax hubin, rabitaan, fakar, xasuus iyo barasho**

| |
|---|
| waxa uu ilmuhu kufiicanyahay yahay/ waxa in laga caaawiyo u baahan: |

3. **Horumarka luuqada**

| |
|---|
| waxa uu ilmuhu kufiicanyahay yahay/ waxa in laga caaawiyo u baahan: |

4. **Aqoonta waxqabadka iyo firficoonida**

| |
|---|
| waxa uu ilmuhu kufiicanyahay yahay/ waxa in laga caaawiyo u baahan: |

5. **Arimaha ilmaha, qoyska iyo xanaanadu ay soo bandhigaan**

| |
|---|
| |

**jawwbta rugta hooyada iyo dhalaanku u soo celiso xanaanada/ Hagitaan iyo qorshaha dabagalka xaaladda**

| | | |
|---|---|---|
| terapiyada jirka: | | |
| Qaybta cawinaada qoyska: | | |
| Terabiyada hadalka: | | |
| Terabiyada wax qabadka: | | |
| dhakhtarka cilimi nafsiga: | | |
| wax kale, waa maxay: | | |

Waalidku waxay ogolaadeen, in xanaanadu ay la xiriiri karto **rugta dhalaanka iyo hooyada** _____
Waalidku waxay ogolaadeen, in rugta dhalaanka iyo hooyada ay la xiriiri karto **xanaanada** _____
Ayadoo la isticmaalayo ruqsada waalidiinta, macluumaadka ilmaha waxaa rugta hooyada iyo dhalaanka ay u diri kartaa goobta xanaanada ee ilamahu ka tirsan yahay haa____maya____

Sixiixa waalidka ______ waxaa la weydiisanayaa daabacaadda-Effic___________________________________